

# QAABKEE U BILAABI KARAA CODSIGA MAGAN-GALYADA?

Dukumiintigaan waxaa loogu tala galay sidii dadka looga caawin lahaa inay fahmaan nidaamka magangalyo doonka ee Koonfur Afrika. Fadlan ogsoonow inuu yahay hage oo kaliya. Mana ahan talo dhanka sharciga ah. Maclumaaadkaanu waa isbadali karaa. Booqo [www.scalabrini.org.za/information-about-asylum-in-south-africa](http://www.scalabrini.org.za/information-about-asylum-in-south-africa) si aad u hesho maclumaaadkii ugu danbeeyay Scalabrini Centre of Cape Town mas'uul kama ahan wixii talaabo ah oo aad qaaddo adoo ku salaynaya dukumiintigaan.

## XASUUSIN MUHIIM AH

Waa muhiim inaad dukumiinti sharci ah haysato inta aad Koonfur Afrika joogto. Dukumiintigu wuxuu kaa ilaalinaya in lagu xiro laguna masaafuriyo wuxuuna xaqiijinaya inaad hesho adeegyo. Dadka ka cararaya colaadaha ama dhibaatooyinka ayaa magangalyo ka codsan kara gudaha Koonfur Afrika. Marka aad arinkaas samaynayso, waxaad dawlada Koonfur Afrika ka codsanaysaa inay ku siiso ammaan ayada oo u maraysa qaab magangalyo ama dukumiinti qaxooti ah. Hawshaani waxay qaadan kartaa muddo dheer. Waxaa muhiim ah inaad bixiso maclumaaad dhab ah oo saxan guud ahaanba inta hanaanku socdo. Haddii aadan Ingiriisiga si fiican ugu hadli karin ama aadan u qori karin, waa muhiim inaad codsato tarjumaan kaa caawiya Xaafiiska Qaabilaadda Qaxootida. Dukumiintigaan waxaa lagu diyaarin doonaa luuqadaha soo socda. Bookho [www.scalabrini.org.za/information-about-asylum-in-south-africa](http://www.scalabrini.org.za/information-about-asylum-in-south-africa) si aad u aragto dukumiintigaan oo luuqad kale ku qoran



**DOORO REFUGEE RECEPTION OFFICE (RRO) EE AAD RABTO INAAD CODSIGA U GUDBISATO**



**DADYOWGA KA KALA YIMID WADAMADA KALA DUWAN**  
WAXAA LOOGA BAAHAN YAHAY INAY REFUGEE  
RECEPTION OFFICE TAGAAN MAALMO KALA DUWAN.  
ISTICMAAL JAANTUSKEENA BOGGA KAN XIGA KU  
QORAN SI AAD U OGAATO MAALINKA AAD TAHAYSO.



**SI TOOS AH U TAG REFUGEE  
RECEPTION OFFICE MAALINKAAS.**  
MARKA AAD HALKAAS TAGTO, QABSO  
BALANTA CODSASHADA  
MAGANGALYO DOONKA.



**MARKA LAGU SIIYO MAGANGALYADA**  
WAXAAD HELI KARTAA  
AQOONSIGAAGA MAGANGALAYADA EE  
LAGU SIIYAAY ADIGA OO RAACAYA  
NIDAAMKA CODSIGA ONLEENKA AH.



**INTAAS KADIB WAXAAD TAGI DOONTAA BALANTA  
LABAAD TAASOO UU KUGU WARAYSAN DOONO**  
SARKAALKA GO'AANKA KA GAARI DOONA XAALADDA  
QAXOOTIGA. KADDIBNA WAXAA LAGU SIIN DOONAA  
GO'AANKA CODSIGAAGA LAGA GAARAY.



**TAG BALANTAADA LAGAAGA QAADAYO  
XOGTAADA SHAKHSIGA AH.**

**MACLUUMAAD INTAAN KA BADAN KA HEL BOGGA KAN XIGA**






Waxaad kaliya magangalyo ka codsan kartaa Koonfur Afrika hadii aad kujirto xaduudaha Koonfur Afrika. Waa inaad magangalyo cadsataa sida ugu dhakhsaha badan. Si aad magangalyo uga cadsato gudaha Koonfur Afrika, waxaad hanaanka ka bilaabaysaa aadista Refugee Reception Office ee aad doonayso inaad ka cadsato.

Khiyaarada kuu furan waa:

- Durban Refugee Reception Office
- Pretoria (Desmond Tutu Refugee Reception Office)
- Musina Refugee Reception Office
- Gqeberha Refugee Reception Office (formerly Port Elizabeth)
- Cape Town Refugee Reception Office

Ka eeg jaantuska hoose si aad u ogaato maalinka aad aadi karto Refugee Reception Office.

Arintaani waxay ku xiran tahay waddanka aad asal ahaan ka timid.



MAALINTA	WADDANKA	LUUQADDA
<b>ISNIIN</b>	Angola, Botswana, DRC, Tanzania, Lesotho, Madagascar, Malawi, Mauritius, Mozambique, Namibia, Seychelles, Zimbabwe, Swaziland, Egypt, Algeria, Pakistan, India, China	French, Swahili, Lingala, Tshiluba, Shona, Chichewa, Portuguese, Arabic, Bangali, Urdu, Gujarat, Punjabi, Hindi, Tsonga
<b>TALAADO</b>	Angola, Botswana, DRC, Lesotho, Madagascar, Malawi, Mauritius, Mozambique, Namibia, Seychelles, Zimbabwe, Swaziland, Egypt, Algeria, Pakistan, India, China	French, Swahili, Lingala, Tshiluba, Chichewa, Portuguese, Arabic, Bangali, Urdu, Gujarat, Punjabi, Hindi, Ndebele
<b>ARBACO</b>	Ethiopia, Burundi, Rwanda, Uganda, Eritrea, Kenya	Amharic, Hadiya, Kambati, Oromo, Swahili, French, Kirundi, Kinyarwanda, Tigrinya, Luganda,
<b>KHAMIIS</b>	Somalia, Cameroon, Senegal, Eritrea, Ethiopia, Ghana, Burundi	French, Wolof, Swahili, Lingala, Twi, Somali, Amharic, Hadiya, Oromo, Tigrinya, Kambata, Kirundi
<b>JIMCE</b>	Somalia, Senegal, China French, Swahili and Lingala speakers	French, Swahili, Mandarin, Lingala, Somali, Wolof



## TALAABADA 2AAD

### TAG XAAFIISKA QAABILAADDA QAXOOTIDA SI AAD BALANTAADA U XAADIRTO

Marka aad ogaato Refugee Reception Office ee aad codsiga ka dhiibayso iyo maalinka aad bookhan karto Refugee Reception Office, toos u aad si aad u xaadirto balantaada codsiga magangalyada.

Soo qaado aqoonsiga waddankaaga ama farqada 23 e (aqoonsigaaga magangalyo doonka) Haddii aadan haysan waxyaabahaan, waa inaad la timaadda caddayn qeexaysa xilgii aad waddanka soo gashay soona qaado marka aad balanta imaanayso.

**Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad haysato waraaqda lagu siiyo marka aad balanta timaaddo. Waxaan sidoo kale kugu dhiirigalinaynaa inaad sawir iskaga qaaddo Refugee Reception Office marka aad tagto, taasoo ahcaddayn.**



## TALAABADA 3AAD

### TAG BALANTAADA

Ku laabo Xaafiska Qaabilaadda Qaxootida Taariikhda laguugu siiyay balantaada.

Balanta koowaad, saraakiishu waxay kaa qaadi doonaan xogtaada iyo macluumaadkaaga. Si fudud tan micnaheedu waa inay kaa qaadayaan faraha ayna kaydinayaan tafaasiishaada.

#### Waxaa intaas kaddib lagu siin doonaa balanta labaad

Balantaan labaad, waxaa ku waraysan doona Sarkaalka Go'aan ka gaarista Xaaladda Qaxootiga (RSDO). Kahor inta uusan ku wareysan RSDO waa inuu kuu sharaxaa hanaanka. Inta wareysigu socdo, RSDO waa inuu ku weydiyya sababaha aad wadankaagii uga soo qaxday iyo sababta ay khatar kuugu tahay inada ku laabato. Waxaa laga yaaba ainuu ku weydiyo caddayn ama qeexitaan muujinaya waxa aad u sheegayso.

**Waxaa intaas kaddib lagu siin doonaa go'aan ku saabsan codsigaaga magangalyada.**



## TALAABADA 4AAD

### KADDIB MAKU LAGU WARAYSTO, WAXAAD KA CODSAN KARTAA ONLEENKA

Kaddib balantaada sarkaalka Go'aan ka gaarista Xaaladda Qaxootiga (RSDO), waxaa lagu siin doonaa lambarka faylkaaga. Adiga oo adeegsanaya lambarkaan faylka, waxaad si onleen ah u codsan kartaa ogolaanshaaaga magangalyada adiga oo adeegsanaya hanaan lamid ah kan onleenka ah.

#### TUSAALAH WAXA LACA RABO IN IIMAYLKAAGA AY LA SOCDAAN....

CTR000184000

Recipients

CTR000184000

File number as it appears on the document:

First Name

Surname

Cell Number:

Alternative contact number:

E-mail address:

Current physical address:

City:

Province:

Send

Ciwaanku ujeedadu  
waa lambarka  
faylkaaga.

Lambarka Faylkaagu  
wuxuu sida caadiga  
ah ka bilowdaa  
saddex xaraf.  
Wuxuu ka bilaaban  
karaa CTR, MUS,  
PTA, ECZ, ama DBN,  
kaddibna waxaa ku  
xiga dhovr lambar.



Eeg macluumaadkeena ku saabsan hanaankeena onleenka ah ee halkaan kujira ama bookho websaytka ([scalabrinini.org.za/information-about-asylum-in-south-africa](http://scalabrinini.org.za/information-about-asylum-in-south-africa))

Waxaan qof walba ku dhiirigalinayaa inuu iskiis codsiga usoo dirsado uuna u raaco nidaamka sida kor loogu sharaxay. Scalabrinini Centre of Cape Town waxay taageero kooban ka siisaa qaybahaa macquulka ah shakhsiyadka adeegsanaya ama codsanaya adeegyada Home Affairs si onleen ah.

KA CODSASHADA  
MAGANGALYADA  
REFUGEE RECEPTION  
OFFICE WAA

**BILAASH  
BILAA  
LACAG AH.**

